



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 012/2010

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo taageeray go'aanka Madaxweyne Sheekh Shariif uu ku kala diray xukuumadda

Nairobi, 17 May 2010 – Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilسان arrimaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah, ayaa maanta sheegay inuu si buuxda u taageersanyahay go'aanka Madaxweyne Sheekh Shariif uu gaaray kuna saabsan xukuumadda, ka dib markuu ogolaaday iscasilaadda Guddoomiyaha Barlamaanka Sheekh Adan Madoobe. Ergeyga Gaarka ah wuxuu yiri waxaan jeclahay inaan arko in Guddoomihii hore ee Barlamaanka uu ogolaado inuu ku soo biiro Golaha Wasiirada cusub siduu madaxweynuhu ugu baaqay.

“Iyadoo uu soo waajahay qalalaase dheer ee aan loo baahnayn oo weeciyay kharash, awood iyo dareenba, Madaxweynuhu wuxuu qaatay go’aan habboon oo geesinimo ku jirto si uu u xalliyi ismariwaagii jiray. Wuxaan jecelahay inaan fursadan ka faa’idaysto oo aan Madaxweynaha ku dhiirrigeliyo hogaanka wanaagsan ee uu muujiyay waxaana ugu baaqayaa dhammaan xildhibaannada Baarlamaanka Soomaaliyeed iyo xubnihii hore ee golihii wasiirrada inay taageeraan Madaxweynaha. Tan waa fursad ku habboob in lagu soo magacaabo Gole Wasiirro oo ka tayo badan kii hore, oo aan rajaynayo inuu si aad ah u hormarin karo Geeddi Socodka Nabadeed ee Jabuuti golahaasoo si wanaagsan ugu adeegi doono dadka Soomaaliyeed ee dhibaataysan, keeni doonana isla xisaabtan dheeraad ah. Wuxaan ku kalsoonahay in doorashada Guddoomiyaha cusub ay noqoto mid furan oona hufan.”

“Madaxweynuhu wuxuu isku halleyn karaa taageerada Qaramada Midoobay iyo Bulshada Caalamka xilligan hadda la joogo. Wuxaan qaswadayaasha iyo kuwa qalalaasaha ka faa’idaysanaya uga digayaa inay soo farageliyaan xaaladda hadda taagan,” ayuu yiri Md. Ould-Abdallah.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org

“Waxaan Bulshada Caalamka ugu baaqayaa inay taageero dhab ah oo la taaban karo siiyaan Madaxweynaha iyo Golihiiisa Wasiirro ee soo socda. Si tan loo gaaro, waxaa loo baahanyahay in dabacsanaan laga muujiyo bixinta kaalmada caalamiga oo laga dhigo mid waxtar leh oo dhacda waqtigii loogu talagalay.

Madaxweynuhu wuxuu ku dhawaaqay go'aankiisa shir jaraa'id uu maanta dhuhurnimadii ku qabya magaalada Muqdisho.

“Shirka Istanbul ee loo qabanayo Soomaaliya wuxuu dhacayaa toddobaadkan dhammaadkiisa, annaga dhammaanteena waxaan ku hanweynahay inaan Madaxweyne Sheekh Shariif kula kulano munaasabaddan muhimka ah oo ay soo wada qabaqaabiyeen Qaramada Middobay iyo Dowladda Turkey,” ayuu yiri Md. Ould-Abdallah.